



Xaashida Ka Qaybgalaha Daryeelka Kooxda Yar

Tilmaamaha: U isticmaal xaashidan si aad u qorto sida macluumaadkani ula xiriirayo shaqadaada la xiriirta dhallaanka, carruurta yaryar, iyo qoysaskooda, iyo si aad uga qaybqaadato hawlaha kulankaan. Haddii aad u baahato meel dheeraad ah oo aad wax ku qorto, isticmaal dhabarka dambe ee boggan.

Qoraallada Qodobbada Muhiimka ah ee Tababarka



Daryeelka Kooxda Yar: Hawlaha Tababarka

Bogga 5. Dib u milicsiga

- ◆ Goobahee ayaad ku daremeysaa badqab oo aad ku nasan karto?

- ◆ Xaaladdee ayaad ku baran kartaa hawlo cusub oo adag?

Bogga 9. Sababaha Daryeelka Kooxda Yar

- ◆ Waa maxay sababta daryeelka kooxda yar ay muhiim ugu tahay dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah?

- ◆ Sidee daryeelka kooxda yar u kobciyaa natiijooyinka wanaagsan ee ilmaha?



Bogga 11. Tusaale Muuqaal ah: Daryeelka Kooxda Yar

- ◆ Sidee bay daryeelka kooxda yar uga faa'iidaysan kartaa carruurtaan iyo daryeel bixiyaashooda?

Bogga 20. Xeeladaha Daryeelka Kooxda Yaryar ee ku salaysan Horumarka

- ◆ Waa maxay xeeladaha qaar ee abuurista iyo ilaalinta kooxo yaryar oo ku saleysan da'da carruurta?
 - Dhallaanka yaryar (dhalashada ilaa 8 bilood)
 - Dhallaanka guurguurta (6 ilaa 18 bilood)
 - Saanqaadayaasha (15 ilaa 36 bilood)

Bogga 37. Aqoonso Tallaabo Kasta oo Yar oo Loo Qaado Daryeelka Kooxda Yar...Sababtoo ah Muhiim ayay u tahay ilmo kasta!

- ◆ Qor fikradaha tallaabooyinka yaryar ee lagu hirgelin karo daryeelka koox yar ee adiga kugu habboon.



Daryeelka Kooxda Yar

Isticmaal ilahaan si aad uga caawiso gudbinta muhiimada daryeelka kooxda yar ee dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah. Waxa uu gacan ka geysanayaa dhiirrigelinta hab-dhaqanada muhiimka ah ee barnaamijyada si loo xaqiijiyo tayada daryeelka qoysaska ee carruurta iyo barnaamijyada xarumaha ku salaysan ee u adeega dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah.

Mabda'a

Daryeelka tayada sare leh ee ku saleysan xiriirka ayaa door muhiim ah ka ciyaara Waynaanta Maskaxda carruurta yaryar, xakamaynta shucuurta, iyo barashada (Center on the Developing Child, 2012). Barnaamijka Daryeelka Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar (Program for Infant/Toddler Care) wuxuu ku talinayaa lix hab-dhaqan oo muhiim ah oo barnaamijyada ah, kuwaas oo u ah qaab-dhismeedka daryeelka ku saleysan xiriirka. Mid ka mid ah dhaqamadaan ayaa ah **daryeelka kooxda yar**—dhaqanka ay daryeel bixiyaasha aasaasiga ah ku bixiyaan daryeelka dhallaanka iyo socod baradka ee kooxo kala duwan, abuurista goob ku dhow isdhexgalka, daryeelka joogtada ah, iyo sahaminta (Lally & Mangione, nd).

Daryeelka kooxda yaryar ee leh tirada hoose ee dadka waaweyn iyo carruurta waxay taageertaa tayada deegaanka daryeelka hore iyo isdhexgalka daryeel bixiyaha iyo ilmaha (Schmit & Matthews, 2013). Daryeelka kooxda yaryar waxa kale oo uu kobciyaa isku ximaanta habboon ee u dhaxaysa dhallaanka iyo daryeel bixiyaashooda, kuwaas oo lama huraan u ah horumarka bulsho iyo shucureed ee caafimaad qaba (Ahnert et al., 2006).

Kooxaha yaryar, sida lagu qeexay barnaamijyada xarun ku-saleysan, waxaa ku jiri kara ilaa lix dhallaan (ka yar 12 bilood jir) oo leh saamiga carruurta iyo qaangaarka ee 1:3. Ilmaha socod baradka ah (da'doodu u dhaxayso 13 ilaa 36 bilood) kooxo aan ka badnayn siddeed carruur ah ayaa lagula talinayaa, oo leh saamiga dadka waaweyn iyo carruurta ee 1:4. Tirada kooxda lagu taliyay ee daryeelka ilmaha qoyska ama daryeelka guriga ku salaysan waa hal daryeel aan ka badnayn lix carruur ah, oo aan ka badnayn laba ka mid ah ay ka yar yihiin da'da 2 (Akadheemiyadda Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta iyo al., 2011). Kooxuhu waxay ka koobnaan karaan carruur isku da' ah ama da' isku dhaf ah.

Waa maxay sababta Daryeelka Kooxda Yar ay muhiim ugu tahay dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah?

- ◆ Daryeelka kooxda yar wuxuu kordhiyaa fursadaha isdhexgalka mid-ka-mid ah iyo daryeelka gaarka ah (Raikes & Edwards, 2009).
- ◆ Xiriirka daryeelka kooxda yaryar waxay u ogolaataa dhallaanka iyo socod baradka ah inay wax ka bartaan, fahmaan, oo sameeyaan xidhiidh daryeel oo ay la yeeshaan dadka waaweyn iyo carruurta kale (Lally et al., 2010).
- ◆ Dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah waxay u baahan yihiin taageero qaangaar si ay u xakameeyaan kicinta deegaanka iyo ka faa'iideysiga meelo kala duwan oo xaddidaya xiriirka kooxaha kale. Daryeel kooxeed yar ayaa ka caawisa habeynta kiciyaasha deegaanka (Tarullo et al., 2009).
- ◆ Daryeelka kooxda yaryar ayaa siiya daryeel bixiyaasha fursad ay ku bixiyaan daryeel gaar ah, bixiyaan taageero inta lagu guda jiro isdhexgalka bulshada, iyo moodhel isdhaafsiga nabadeed kor u horumarinta xiriirka dhow (Lally, 2013).
- ◆ Saamiyada yaryar ee qaangaarka iyo carruurta iyo kooxaha yaryar ayaa ah saadaaliyaal xooggan oo ah kororka isdhexgalka shaqaalaha ee wanaagsan (Kreder et al., 2005).

- ◆ Daryeel kooxeed yar waxa ay u ogolaataa in ay yaraato wax-ka-jeedin iyo kicin yar oo loogu talagalay dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah iyo daryeel bixiyaasha, taageeridda deegaan tayo leh (Lally et al., 2010).

Sidee Daryeelka Kooxda Yar u kobciyaa natiijooyinka wanaagsan ee ilmaha?

- ◆ Daryeel bixiyaasha la shaqeeya kooxaha yaryar ee dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah waxay u badan tahay inay bixiyaan waxqabadyo korriin ku habboon oo fududeeya garashada iyo horumarinta luqadda (Lally et al., 2010; McMullen & Dixon, 2009).
- ◆ Isdhexgalka jawaab celinta leh ee ixtiraamaya baahiyaha shaqsi iyo danaha ilmo kasta waxay taageertaa korriinka dareenka caafimaadka leh iyo is-xakameynta, bixinta jawi u oggolaanaya dhallaanka iyo socod baradka inay diiradda saaraan (Lally et al., 2010; Tarullo et al., 2009).
- ◆ Daryeelka kooxda yaryar waxa uu caawiyaa fududaynta cilaaqaadka asaaga ah ee dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah waxana ay kor u qaadaa fursadaha xalinta mashaakilaadka iyo ogaanshaha adduunkooda (Lally et al., 2010).

Qorshaynta Hirgelinta Daryeelka Yaryar ee Goobaha Daryeelka Carruurta ee Kala Duwan

Yoolka: Barnaamijyada dhallaanka iyo ilmaha socod-baradka ah oo tayadoodu sarreyso ayaa lagu daryeelaa carruurta kooxo yaryar oo leh saamiga carruurta waaweyn iyo kuwa hoose.

- ◆ Hirgeli hagitaan qoraal ah oo taageera daryeel koox yaryar u qabaysan dhaqan ahaan dhammaan barnaamijka. Tilmaantaan waxa ku jira buug-gacmeedyada shaqaalaha iyo qoyska oo wadaaga muhiimada, iyo sidoo kale ku dhaqanka, daryeelka kooxda yar sida ay qeexday Akadheemiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta.
 - Isticmaal shuruudaha barnaamijyada xarun ku-salaysan iyo daryeelka carruurta qoyska ee qaybta caqligalka ah, ee sare.
 - Siyaasadaha iyo qorsheynta xaruntu waxay u ogalaanayaan dadka waaweyn inay si joogta ah u ilaashadaan tirada kooxda lagu taliyay maalintii oo dhan, hadday tahay gudaha iyo dibaddaba.
 - Samee siyaasado qoran oo qeexaya nidaamka kooxo yaryar oo saamigoodu hooseeyo kaas oo ilaalinaya carruurta leh daryeel bixiyaha aasaasiga ah oo dhan inta ilmuhu diiwaangashan yahay, ilaa da'da 3 sano.
- ◆ U samee sharaxaad shaqo oo loogu talagalay daryeel bixiyaasha dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah oo ay ku jiraan rajooyinka horumarinta xiriirka daryeelka aasaasiga ah ee koox yar oo carruur ah.
- ◆ Ka qaybgal, abuur, ama u dood horumarka xirfada ee fikradaha iyo hirgelinta daryeelka kooxda yaryar. Taageer wada-hadallada socda ee lala yeesho shaqaalaha maamulka daryeelka carruurta ee xarun ku-saleysan ama qoyska si loo joogteeyo kooxaha yaryar iyo saamiga carruurta iyo dadka waaweyn oo hooseeya.
- ◆ Isticmaal nidaamka dib u eegista ula kaca ah si aad si joogto ah u xoojiso ku dhaqanka daryeelka kooxda yaryar ee guud ahaan xarunta ama barnaamijka daryeelka ilmaha qoyska.



Tixraacyada

- Ahnert, L., Pinquart, M., & Lamb, M. E. (2006). Badqabka cilaqaadka carruurta ee bixiyaasha daryeelka aan waalidka ahayn: (Security of children's relationships with nonparental care providers): Falanqeynta Xogta Hoose. *Kobaca Ilmaha*, 77, 664–679. <https://doi.org/10.1111/j.1467-8624.2006.00896.x>
- Akadheemiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta, Ururka Caafimaadka Dadweynaha Maraykanka, iyo Xarunta Kheyraadka Qaranka ee Caafimaadka iyo Badbaadada Daryeelka Carruurta iyo Waxbarashada Hore. (2011). *Caring for Our Children: Xarunta Qaran ee Caafimaadka iyo badqabka (National health and safety heerarka waxqabadka, Tilmaamaha daryeelka hore iyo barnaamijyada waxbarashada* (daabacaada 3aad.).
- Center on the Developing Child. (2012). *Hawl Fulinta (Executive function): Xirfadaha nolasha iyo waxbarashada* [InBrief summary]. <http://developingchild.harvard.edu/resources/inbrief-executive-function/>
- Kreader, J. L., Ferguson, D., & Lawrence, S. (2005). *Tayada daryeelka ilmaha dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah (Infant and toddler child care quality)*. Xarunta Qaranka ee Carruurta Faqriga ah (National Center for Children in Poverty). http://www.nccp.org/publications/pub_626.html
- Lally, J. R. (2013). *Loogu talagalay carruurteena (For our babies): Soo afjarida dayaca aan muuqan ee dhallaanka Mareykanka*. WestEd; Teachers College Press.
- Lally, J. R., & Mangione, P. L. (n.d.). *Xog ku saabsan Barnaamijka Xannaanada Dhallaanka/Ilmaha socod baradka ah*. WestEd; Waaxda Waxbarashada California. Waxaa la soo xigtay Juun 10, 2020, waxaana laga soo xigtay <https://www.pitc.org/about>
- Lally, J. R., Torres, Y. L., & Phelps, P. C. (2010). *Sida loo daryeelo dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah koox ahaan (How to care for infants and toddlers in groups) Dhaqanka Ku Habboon Koritaanka*. Waxaa la soo xigtay Juun 10, 2020, waxaana laga soo xigtay <https://www.zerotothree.org/resources/77-how-to-care-for-infants-and-toddlers-in-groups>
- McMullen, M. B., & Dixon, S. (2009). Taageerida nidaamka xiriirka ku saleysan ee tababarka dhallaanka iyo socod baradka ee gudaha Mareykanka. In J. Brownlee (Ed.), *Barashada ka qaybqaadashada iyo sanadaha hore* (bogga 109–128). Routledge.
- Raikes, H., & Edwards, C. (2009). *Kordhinta qoob ka ciyaarka daryeelka dhallaanka iyo ilmaha socod baradka ah (Extending the dance in infant and toddler caregiving)*. Paul H. Brookes Publishing Company, Inc.
- Schmit, S., & Matthews, H. (2013). *Ku habboon Carruurta (Better for babies): Daraasad ku saabsan siyaasadaha daryeelka ilmaha ee dhallaanka iyo ilmaha socod-baradka ah ee gobolka*. Xarunta Sharciga iyo Siyaasadda Bulshada (Center for Law and Social Policy).
- Tarullo, A. R., Obradovic, J., & Gunnar, M. R. (2009). Is-xakameynta iyo horumarka maskaxda (Self-control and the developing brain). *Zero to Three*. https://www.researchgate.net/publication/303230063_Self-control_and_the_developing_brain

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natiijooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

State Capacity Building Center, A Service of the Office of Child Care

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401
limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub
http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR
CHILDREN & FAMILIES

Tababarka Daryeelka Ku Saleysan Xiriirka

Hawsha Vignette: Daryeelka Aasaasiga ah, Sii wadista Daryeelka, iyo Daryeelka Kooxda Yaryar



CHILD CARE

State Capacity Building Center

Hawsha Vignette: Daryeelka Aasaasiga ah, Sii wadista Daryeelka, iyo Daryeelka Kooxda Yaryar

Vignette A

Anna waa 2½ sano jir. Tani waa maalintii ugu horeysay ee ay dib ugu soo laabato daryeelka kooxda ka dib toddobaad ay guriga kula joogto qoys si ay u soo dhaweeyaan walaasheed cusub. In kasta oo ay sannad ka diiwaan gashaneyd gurigan daryeelka carruurta ee qoyska oo ay saaxiibo badan ku leedahay, waxay isku tuurtay dhulka waxayna bilowday inay ooyaan oo dhulka laaddo markii aabbaheed uu diyaar u ahaa inuu macsalaameeyo.

- ◆ Waa maxay siyaabaha qaar oo daryeelka aasaasiga ah, sii wadista daryeelka, iyo daryeelka kooxda yaryar ay uga caawin karaan Anna inay dareento ammaan iyo raaxo inta lagu jiro kala gurka?
- ◆ Sidee dhaqamadaan u taageeri karaan aabaheed?
- ◆ Sidee dhaqamadaan u taageeri karaan daryeel bixiyaasha?

Vignette B

Yas waa 2 sano jir firfircoon oo hadda bilaabay inuu hadlo. Wuxuu dhigtaa fasal ay dhigtaan 12 socod barad ilmo ah. Dhowrkii billood ee la soo dhaafay, waxa uu si ka badan sidii caadiga ahayd u riixayay carruurta oo uu duminayay dhismayaal ay carruur kale dhisteen. Maanta, waa markii labaad ee bishan uu ilmo gacanta ka qaniinay. Carruurta waxay bilaabeen inay qayliyaan mar kasta oo uu u soo dhawaado, waxayna u sheegaan inuu ka tago. Goobta baabuurta la dhigto, waalidiinta Yas waxay ka xishoodaan inay maqlaan waalid kale oo sheegaya in Yas ay dhibaato ku tahay fasalka.

- ◆ Waa maxay siyaabaha qaar ee daryeelka aasaasiga ah, sii wadista daryeelka, iyo daryeelka kooxda yaryar ay ku taageeri karaan Yas?
- ◆ Sidee dhaqamadaan u taageeri karaan daryeel bixiyaasha?
- ◆ Sidee dhaqamadaan u taageeri karaan carruurta iyo qoysaska?

Xarunta Dhisidda Awoodda Gobollada (State Capacity Building Center, SCBC) waxay la shaqaysaa hoggaamiyeyaasha gobollada iyo dhulalka ay dawladdu xukunto iyo la-hawlgalayaashooda si ay u abuuraan nidaamyo iyo barnaamijyo carruurnimada hore ah oo hal-abuur leh kuwaas oo sare u qaada natiijooyinka carruurta iyo qoysaska. SCBC waxaa maalgelisa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Xafiiska Daryeelka Carruurta.

State Capacity Building Center, A Service of the Office of Child Care

9300 Lee Highway
Fairfax, VA 22031

Taleefoonka: 877-296-2401
limaylka: CapacityBuildingCenter@ecetta.info

Isdiwaangeli si aad u hesho Wararka cusub
http://www.occ-cmc.org/occannouncements_sign-up/



ADMINISTRATION FOR
CHILDREN & FAMILIES